

Casuumaad si aad Noogu Adeegto: Kooxda Naqshadeynta Gobolka Waxbarashada Gaarka ah ee 2021–22 (2021–22 Special Education State Design Team)

Ogaysiis ku socda iskaashatada: Sahankan sidoo kale waxaa loo tarjumay luuqado dheeri ah. Guji si aad u soo dejiso oo aad u daabacato: Carabi | Shiinees | Ingiriisi | Hindi | Kuuriya | Marshallese | Punjabi | Ruush | Soomaali | Isbaanish | Tagalog | Yukreeniyaan | Fiyatnaamiis

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI) waxay raadineysaa iskaashato inay ka qeybqaataan shaqo muhiim ah iyagoo ka wakiil ah ardayda naafada ah ee gobolka Washington. Kooxda Naqshadeynta Gobolka ayaa koox shaqsiyaad kala duwan ah ku daraysa si ay iskaashi uga la sameeyaan OSPI dhanka mowduucyada soo socda*:

1. Caruurnimada Hore (Early Childhood) (Qorshaha Waxqabadka Gobolka [State Performance Plan, SPP] Tilmaamayaasha B-6, B-7, B-12, iyo B-17)
2. Kala Guurka Kadib Dugsiga Sare (Tilmaamayaasha B-1, B-2, B-13, iyo B-14)
3. Ku Dhaqanka Ku Darista iyo Natiijooyinka Ardayda (Tilmaamayaasha B-3 iyo B-5)
4. Ka Qeybgalka Waalidka (oo ay ku jiraan sameynta sahan waalid oo cusub) (Tilmaamaha B-8)
5. Sinaan La'aan iyo Sinaan La'aanta Weyn (Tilmaamayaasha B-4, B-9, iyo B-10)
6. Kormeerka Waxbarashada Gaarka ah iyo Faa'iidada Waxbarashada ee ardayda
7. Sahaminta Nidaamka Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (Individualized Education Program, IEP) ee Gobolka oo dhan

*Sharaxaad ka bixi mid kasta oo ka mid ah 17 Tilmaamayaasha Waxqabadka Gobolka (SPP), guji [halkan](#).

Shaqada Kooxda Naqshadeynta Gobolka waxay diiradda saari doonaan ka shaqaynta xoog saaridda sinnaanta jinsiyadaha iyo kala duwanaanta ee dhammaan howlaha kormeerka waxbarashada gaarka ah. Hawsha waxaa la filayaa inay bilaabato xagaaga 2021 iyadoo kulan dhamaystiran oo dhanka Zoom-ka lala yeelanayo Kooxda Naqshadaynta Gobolka (oo soconayo 60–90 daqiiqo), oo lala yeelanayo kulan kooxo yar-yar oo dhanka khadka ah oo ku saabsan mawduucyada kor ku xusan. Shaqada kooxaha yar-yar, oo ay ku jiraan ajandayaasha, fududeynta, iyo dhererka/soo noqnoqoshada kulamada dhanka khadka, waxaa si wada jir ah loogu qaabeyn doonaa xubnaha koox shaqeed kasta.

Iskaashatada waxay fursad u heli doonaan inay ra'yi celin ku bixiyaan siyaabo kala duwan, oo ay ku jiraan ka qaybgalka shirarka dhanka khadka, wicitaannada taleefannada, iimaylka, dib u eegista dukumintiyada qabyada ah, shirar maxalli ah, iwm. Waxaan soo dhawaynaynaa soo jeedinno dheeri ah oo ku saabsan siyaabaha loola macaamilo iskaashatada iyo bulshada.

Waxaan garwaaqsannahay in sahaminta dhanka khadka ay tahay hal qaab oo lagu muujiyo xiisaha ka qeybgalka Kooxda Naqshadeynta Gobolka ee mawduucaaga (mowduucyadaada) aad xiisaynayso.

Haddii adiga ama qof aad taqaanid u baahan yahay taageero xagga luqadda ama qaab kale oo aad noola soo xiriirto, iskaashatada waxaa lagu martiqaadayaa inay naga soo wacaan lambarkan 360-725-6075 ama iimayl [iimaylka Washington Integrated System of Monitoring \(WISM\)](#).

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid Kooxda Naqshadeynta Gobolka ama sahankan, ama soo gudbinta foomkan pdf-ka ah, fadlan la xiriir [limaylka WISM](#) wixii macluumaad dheeraad ah.

Waxaan rajeyneynaa inaan iskaashigan adiga kula samayno!

Daacadnimo,

Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI

Fadlan ka jawaab waxa soo socda: (jawaabaha ayaa looga baahan yahay su'aalaha u qoran qaabka **bold**)

1. **Magaca:** _____
2. **limeylka:** _____
3. Lambarka taleefanka (ikhtiyaari): _____
4. Waa maxay jinsiyadaada/qowmiyadaada? (ikhtiyaari)
 - Hispanic/Latinx
 - Hindida Maraykanka/Dhalad Alaska
 - Aasiyaan
 - Maraykan Madow/Afrikaan ah
 - Hawaii Dhalad/Ka Soo Jeeda Jasiiradaha Kale ee Baasifiga
 - Cadaan/Caucasian
 - Labo ama In Ka Badan oo Jinsiyad
5. Luuqadee(luuqadahee) ku hadashaa? (ikhtiyaari) _____
6. **Degmo dugsiyeed nooc ee ah ama degmooyinkee ayaad ku xiran tahay?** _____
7. **Waa kuwee heerarka da'da/fasalka ee aad taageerto? (calaamee dhammaan inta ku habboon)**
 - Dhalashada illaa labo jir
 - Xanaanada Ka Hor (da'da 3 illaa 5)
 - Dugsiga hoose (Xanaanada ilaa fasalka 5)
 - Dhexe (Fasalada 6-8)
 - Sare (Fasalada 9-12)
 - Dugsiga Sare Ka Dib (Da'da 18-21)
8. **OSPI waxaa ka go'an in kooxdan qaabeynta ku darto koox aragtiyo kala duwan, oo ay ku jiraan ardayda iyo shakhsiyaadka naafada ah, waalidiinta iyo xubnaha qoyska, xubnaha bulshada iyo ururada, iyo barayaasha iyo xirfadleyda. Fadlan sheeg xiriirada aad la leedahay waxbarashada gaarka ah ah (dooro dhamaan kuwa khuseeya):**
 - Arday
 - Shaqsi nafo ah
 - Waalidka/Masuulka ama Xubin Qoyska Ka Tirsan
 - Xubin ama Urur Ka Tirsan Bulshada (*Haddii aad dooratay, fadlan sheeg ururka*) _____
 - Iskaashi Qabiil (*Haddii aad dooratay, fadlan sheeg xiriirka*) _____
 - Garyaqaan
 - Macalinka Waxbarashada Gaarka ah
 - Macalinka Waxbarashada Guud
 - Caawiyaha Shaqaalaha Waxbarashada (Educational Staff Associate, ESA) ama Shaqaalaha kale ee Shahaado haysta

Maamulaha Waxbarashada Gaarka ah
Maamulaha kale ee Degmada
Shaqaalaha Kala Duwan
Wakiilka Wakaaladda Gobolka (*Haddii aad dooratay, fadlan sheeg wakaaladda*) _____
Wakiilka Ururka Xirfadlayaasha (*Haddii aad dooratay, fadlan sheeg ururka xirfadlayaasha*) _____
Wax kale _____

9. **Waa kuwee dhanka(dhinacyada) aad xiiseyneyso inaad iskaashi naga la samayso? (dooro dhammaan inta ku habboon)***

Caruurnimada Hore (Tilmaamayaasha SPP B-6, B-7, B-12, iyo B-17)
Kala Guurka Kadib Dugsiga Sare (Tilmaamayaasha B-1, B-2, B-13, iyo B-14)
Ka Qeybgalka Waalidka (Tilmaamaha B-8)
Ku Dhaqanka Ku Darista iyo Natiijooyinka (Tilmaamayaasha B-3 iyo B-5)
Sinaan La'aan iyo Sinaan La'aanta Weyn (Tilmaamayaasha B-4, B-9, iyo B-10)
Kormeerka Waxbarashada Gaarka ah iyo Faa'iidada Waxbarashada ee Ardayda
Sahaminta Nidaamka IEP ee Gobolka oo dhan

**Sharaxaad ka bixi mid kasta oo ka mid ah 17 Tilmaamayaasha Waxqabadka Gobolka (SPP), guji [halkan](#).*

10. Macluumaad dheeri ah oo aad jeclaan lahayd OSPI inay ogaato (sida baahiyaha luqadda ee loo baahan yahay, waafajinta looga baahan yahay ka qeybgalka shirarka, ama macluumaad kale):

Waad ku mahadsantahay wadaagida xiisayntaada! Iskaashigaaga ayaa fure u ah shaqadan.